

TILMAAMAHA FOOMKA DALABKA KAALMADA DHAQAALE



Kani waa dalab loogu talagalay kaalmada dhaqaale ee Nidaamka Caafimaadka MultiCare

Gobolka Washington wuxuu ka rabaa cusbitaalada oo dhan inay siiyaan kaalmo dhaqaale dadka iyo qoysaska buuxiyaha shuruudaha dakhliga qaarkood. Waxa dhici karta inaad u qalanto daryeel bilaash ah ama daryeel qiime-dhimis lagu sameeyey oo kusalaysan xajmiga iyo dakhliga qoyskaaga, xiitaa haddii aad caymiska caafimaadka leedihiin. MultiCare waxay isticmaashaa Tilmaamaha Saboolnimada Fadaraalka si ay uga caawiyaan go'aansiga Barnaamijka Kaalmada Dhaqaale aad ugu habboon baahiyaha bukaan kasta. Kadib qiimayn dhaqaale marka lagu sameeyo dakhliga bukaanka, biilka bukaanka waxa la dhimi doonaa 100% haddii heerkiisa dakhligoodu uu gaadhayo ama ka hooseeyo 300% ee Tilmaamaha Saboolnimada Fadaraalka. Haddii heerka dakhliga bukaanu u dhaxayso 301 boqolkiiba ilaa 500 boqolkiiba ee Tilmaamaha Saboolnimada, biilka bukaanka waxa la yarayn doonaa iyadoo la raacayo miisaanka isla beddesha xaaladda ee hoose.

Heerka Saboolnimada, Ilaa				
300%	350%	400%	450%	500%
Qiime Dhimista Sadaqada, %				
100%	95%	90%	80%	70%
Waajibaadka Bukaanka, %				
0%	5%	10%	20%	30%

Maxay kaalmada dhaqaale dabooshaa? Kaalmada dhaqaale ee cusbitaalku waxay dabooshaa adeegyada cusbitaalka kusalaysan ee habboon ee ay bixiso Nidaamka Caafimaadka MultiCare iyadoo ku xidhan mutaysigaaga. Kaalmada dhaqaale waxa dhici karta inayna daboolin kharashaadka daryeelka caafimaadka oo dhan, oo ay kujiraan adeegyada ay bixiyaan ururada kale.

Haddii aad qabto su'aalo ama u baahan tahay caawimo dhammaystirka dalabkan: Booqo multicare.org/financial-assistance/ si aad u aragto Su'aalaha Badanaa la Iswaydiiyo ama waxaad wici kartaa:

- MultiCare Puget Sound Region 253.876.8550
- MultiCare Inland Northwest Region 509.473.4769
- MultiCare Rockwood Clinics 509.342.3600

Waxaad ka heli kartaa caawimo sababta ay doonto ha noqotee, oo ay kujirto kaalmada naafonimada ama luuqadda.

Si dalabkaaga looga hawlgalo, waa inaad:

- Na sii macluumaad kusaabsan qoyskaaga – Ku buuxi tirada xubnaha qoyska ee guriga kugula nool (qoyska waxa kamid ah dadka aad isla dhalateen, gacalka, ama dadka aad korsato ee kula nool)
- Na sii macluumaadka kusaabsan dakhliga guud ee bishii ee qoyskaaga (dakhliga aan canshuurta iyo waxyaalaha kale midna laga jarin)
- Bixi caddaymaha dakhliga qoyska
- Ku lifaaq macluumaad dheeraad ah haddii loo baahdo
- Saxeex oo taariikhee foomka

Ogow: Ma aha khasab inaad bixiso lambarka Sooshiyaal Sikiyuuriti si aad u dalbato kaalmada dhaqaale. Haddii aad na siiso lambarkaaga Sooshiyaal Sikiyuuriti wuxuu naga caawin doonaa inaanu kordhino ka shaqaynta dalabkaaga. Lambarrada Sooshiyaal Sikiyuuriti waxa loo isticmaalaa in lagu xaqiijiyo macluumaadka la na siiyo. Haddii aanad lahayn lambarka Sooshiyaal Sikiyuuriti, fadlan calaamadee "aan khusayn" ama "NA."

Si aad u gudbisno dalabkaaga dhammaystiran oo caddaymuhu u dhan yihiin:

- Fakis ugu dir 253.864.4017;
- Boostada u dhig MultiCare Health System, Business Support Center
PO BOX 5299 • M/S 1002-1-PFN • TACOMA, WA 98415-0299; ama
- Adiguba Ku celi waxa kamid ah waaxahayaga Dhigista/Diiwaangalinta ee ku yaala MultiCare Tacoma General Hospital, MultiCare Allenmore Hospital, MultiCare Good Samaritan Hospital iyo MultiCare Auburn Medical Center, MultiCare Deaconess Hospital, iyo Valley Hospital inta u dhaxaysa saacadaha 8 habeenimo iyo 5 galabnimo, Isniinta ilaa Jimcaha.

Waxaanu kugu ogaysiin doonaa go'aanka ugu dambeeya ee mutaysiga iyo xuquuqda rafcaanka, haddii ay khusayso, 14 maalmood gudahood laga bilaabo helista dalabka kaalmada dhaqaalaha ee dhammaystiran, oo ay la socdaan caddaymaha dakhligu.

Gudbinta dalabka kaalmada dhaqaale, waxaad oggolaanaysaa inaanu samayso waydiimaha daruuriga ah si aanu u xaqiijino waajibaadka dhaqaale iyo macluumaadka.

Waxaanu rabnaa inaanu ku caawino. Fadlan dhakhso u gudbi dalabkaaga!